

Maxaa dhacayo haddii aan deegaan kale u guuro ama aan raboодо inaan bedesho Dhakhtarkeyga?

Haddii aad u guurto deegaan kale ama aad rabooto inaad dhakhtarkaada bedelato waad awoodaa inaad sameyso sidaas. Ogolaanshahaada awgiis ayaa diiwaan caafimaadkaada laguugu dirayaa dhakhtarkaada cusub.

Ma diiwaan gelin karaa caruurteeyda?

Dhamaan dhakhaatiirtu waxay u diyaariyaan adeeg lacag la'aan ah caruurta ka yar 6 jir. Adigu waad ka diiwaan gelin kartaa Ururka Caafimaadka Aasaasigaa cunug kasta oo daryeelkaada ku jiro haddii ay 16 jir yihiin ama kaba yar yihiin. Xoogaa Ururada Caafimaadka Aasaasigaa waxay u diyaariyaan adeeg lacag la'aan ah caruurta 18 jir ka yar. Weydii Xafiiska soo dhaweynta ujirada (kharash) adeega caruurta.

Daryeelka Caafimaadka Aasaasiga (Dabbaaqad Guud) iyo Ururada Caafimaadka Aasaasigaa

Primary Health Care (general Practice) and Primary Health Organisations (PHO)



AUCKLAND REGIONAL PUBLIC HEALTH SERVICES REFUGEE HEALTH

Ururada Caafimaadka Aasaasigaa

Maxay yihiin Uurada Caafimaadka Aasaasiga?

Ururada Caafimaadka Aasaasigaa waa kooxo Xirfidhayaal Guud (Dhakhaatiir) kuwaasoo ah deriskaada. Badaanaba waa kuwa ugu horeeyo ee aad xiriir la sameeyso goorta adiga ama qoys kaadu jiradaan.

Haddii dhakhtarkaadu qeyb ka yahay Ururka Caafimaadka Aasaasigaa adiga waad awoodaa inaad iska diiwaangeliso si aad u hesho kabitaan dhaqaale. Haddii dhaqtarkaadu uusan ka mid ahayn Ururka Caafimaadka Aasaasigaa waxaad kartaa inaad si joogto ah u isticmaasho kaarta Adeega Bulshada ama waxa jiri karo Ururrada Caafimaadka Aasaasigaa kuugu dhow oo awooda inay ku diiwaangeliyaan adiga iyo qoyskaada.

Waa maxay faa'idooyinka iska-diiwaangelinta Ururka Caafimaadka Aasaasigaa?

- Ururada Caafimaadka Aasaasigaa waxay hibeeyaan ujro dhimid . Marka loo eego qiimaha kala duduwan ee cadadda deeqeed taasoo Ururada Caafimaadka Aasaasigaa ka helaan Dawladda. Waad weydiin kartaa xafiiska soo dhoweynta liiska ujrooyinka.
- Ururada Caafimaadka Aasaasigaa waxay hibeeyaan Adeegyo dheeraad ah, sida kalkaaliyaal Caafimaad oo awooda inay kugu soo booqdaan guriga.

Sideebaan isaga diiwaangelin karaa Ururada Caafimaadka Aasaasigaa?

Waa inaad ka diiwaan gashaa Dhakhtarka aad inta badan isticmaasho. Weydiiso xafiiska soo dhoweynta foomka diiwaangelinta Ururada Caafimaadka Aasaasigaa ee Dhakhtarka inta badan aad isticmaasho. Dhakhtarkaada iyo kalkaaliyahaada way awoodaan si fiican inay u xannaaneeyaan haddii iyagu aqoon kuu leeyihiin adiga iyo qoyskaada. Waxaad weliba kaloo awooddaa inaad Dhakhaatiir kale aragto, kuwaasoo kuu arki karo bukaan caadi ah.

Ma aadi karaa Bukaan socod eegto deg-deg ah saacadaha shaqada keddib?

Waad tegi kartaa Bukaan socod eegto deg-deg ah saacadaha shaqada kedib.